

## Barasho dheeraad ah u yeelo OPA

Booqo bartayada internetka

[seattle.gov/opa](http://seattle.gov/opa)

Naga soo wac

**206-684-8797**

Nagala soo xiriir Twitter

**@SeattleOPA**

This brochure is about the mediation process with the Office of Police Accountability. If you would like to receive it in languages other than English call 206-684-8797.

這本手冊將介紹警察責任辦公室的調解過程。如果您想獲取相關的繁體中文版本，請致電 206-684-8797。

这本手册介绍了警察责任办公室的调解程序。如果您想获取相关的简体中文版本，请致电 206-684-8797。

Este folleto explica el proceso de mediación de la Oficina de Responsabilidad Policial. Si desea recibirla en español, llame al 206-684-8797.

Tờ thông tin giải thích qui trình hòa giải Văn phòng thẩm định trách nhiệm cảnh sát. Nếu quý vị muốn nhận bản tiếng Việt, vui lòng gọi số 206-684-8797.



Seattle Office of  
Police Accountability



@SeattleOPA

## Waa maxay OPA?

Xafiiska La Xisaabtanka Boliiska ayaa mas'uul ka ah ka baaraandegidda eedeymaha anshax-darrada ah ee ay ku lug-leeyahii shaqaalaha Waaxda Booliska Seattle (SPD). Wuxaan sidoo kale bulshada kala tashanaa kormeerka booliska, waxaan ku talinnaa in dib-u-eegis lagu sameeyo siyaasadda SPD, iyo in aan la socono adeegsiga xooggan ee ciidanka booliska. Wuxaan ka shaqeynaa meel ka baxsan xafiisyada Booliska Seattle SPD waxaanan leenahay hoggaamiyн rayid ah. Inta kale ee shaqaalaheena waa isku dhaf rayid iyo sajinada SPD isugu-jirta



"Shaqaalaha SPD" wuxu la micna yahay qof kasta oo u shaqeeya Waaxda, oo ay ku jiraan shaqaalaha la dhaariyay ee dhaqangaliya sharciga iyo rayidka.

## Maxaa laga filayaa ka qeybgalayaashu inta lagu guda jiro dhexdhexaadinta?

- ✓ In ay saxeexaan heshiis qarsoon oo sharci ahaan waajib ku ah qof-kasta fuliyo
- ✓ In ay dhagaystaan kana qeyb-galaan doodda
- ✓ In ay raadiyaan natijjo ka soo baxda isfahamka labada dhinac
- ✓ Ogolow in waxbaaritaan ah ama anshax marin aysan xigi doonin

## Xafiiska La-xisaabtanka Boliiska (OPA)

Dulmarka Nidaamka  
Dhex-dhexaaninta



Seattle Office of  
Police Accountability

Wax badan ka baro hawsheena  
**seattle.gov/opa**

## Waa maxay dhex-dhexaadintu?

Dhex-dhexaadintu waa baddal kale oo ka duwan in lagu xalliyo cabasho dhaqameedka. Waxay siisa fursad xubin bulshada ka mid ah iyo shaqaalaha Waaxda Boliiska Seattle in ay ka wada hadlaan is-afgaranwaaga iyagoo uu hagayo dhinac saddexaad oo dhexdhexasd ah.

Hadafyada barnaamijka dhex-dhexaadinta ee Xafiiska La-xisaabtanka Boliiska (OPA) waxaa loogu talagalay ka-qaybgalayaasha in ay:

- Dareemaan awood ay ku-yeelanayaan geeddi-socodka cabashada iyo xalkeeda
- Fahan yeeshaan, helaana aragtiyo cusub iyaga oo wadahadal yeelanaya
- Aqoonsadaan sababaha uu isku-dhacu ka-dhasho
- Bartaan sida ay ugu fogaandaan isfaham la'aan la mid ah mustaqbalka.



## Dacwadeydu (cabashadaydu) miyey ku habboon tahay dhex-dhexaadinta?

OPA waxay u doorataa cabashooyinka dhexdhexasd ku saleysan oo la jaan qaada dhaqamada ugu wanaagsan ee qaranku wax ku xalliyo. Taas waxaa ka mid ah qiimeyn ta nooca iyo xajmiga eedeynta leedahay, iyo sidoo kale suuragalnimada in la gaaro xal lagu guuleysto. Haddii OPA ay ku siiso dhexdhexasd, adiga ayaa ikhtiyaar u leh in aad aqbasho ama aad raacdoo dariiqa dhaqameed. Dad badan oo ku heshiyya dhex-dhexaadinta ayaa u arka in ay tahay hab ay ku qanci karaan xallinta cabashadooda.

## Yaa dhex-dhexaadin doona cabashadayda?

Dhex-dhexadiyaasha OPA waxay yihii dad leh aasaasyo xirfadeed oo kala duwan, oo ay ku jiraan dad u adeegga dadweynaha, sharciga, caddaaladda midabka la-xidhiidha, iyo cududda shaqaalaha. Dhex-dhexadiyaasha, qeyb ahaan, sababtoo ah waxaa loo arkaa in ay yihii muraayadda caddaaladda soo-celinta iyo isku dheelitirka awoodda ka qeyb-galayaasha. Xafiiska King County ee Xallinta Khilaafaadka Baddalka ah ayaa iyaga hawlgaliya.



Haddii aad u baahan tahay tarjubaan ama adeeg kale oo lagugu caawiyo kulanka dhexdhexasd, OPA ayaa idii diyaarineysa.

## Maxaan ka filan karaa kulanka dhex-dhexaadinta?

- 1 Dhex-dhexadiiyaha ayaa si gooni-gooni ah ula kulmayaa ka qeyb-galayaasha



- 2 Dhex-dhexadiiyaha ayaa kulminaya ka qeyb-galayaasha, wuxuu u sharaxayaa geeddi-socodka, wuxuuna dajinayaa xeerarka lagu-dhaqmayo



- 3 Ka qeyb-galayaasha ayaa wadaagaya aragtiyo kusaabsan isku-dhaca



- 4 Dhex-dhexadiiyaha ayaa dib u eegaya arrimaha wuxuuna weydiinayaa su'aalo



- 5 Ka qeyb-galayaashu ayaa soo gabagabaynaya wadahadalka

